Disability Inclusion
Education for All

# Heerarka la qabsiga

**Qofka wax isku dubaridaya ayaa taageeri doona xubnaha SSG si ay uga wada shaqeeyaan inay diyaariyaan xogta-shaqsiga (profile ka) inta lagu guda kiro kulanka, oo ay ku jirto in lagu heshiiyo ilaa heerka wax laga bedalayo ee loo baahan yahay si loo suurtageliyo ka qaybgalka iyo waxbarashada ardayga.**

| Tilmaanta ilaa heerka la qabsashada | Maxay tani ka dhigan tahay? |
| --- | --- |
| Ardaydu waxay helayaan barnaamijka waxbarashada ee la siiyo ardayda isku da'da ah ee qeyb ka ah marxallada markaas taagan ee taageerada **lagu bixiyo heerka dugsiga oo dhan.** | Tani macnaheedu waxa weeye la qabsi ama wax ka badelid looma baahna. |
| **Waxbarasho kala duwan** waxa loola jeedaa habaynta fasalka oo dhan taas oo taageerta koox ballaadhan oo arday ah si ay u helaan waxbarasho si la mid ah kuwa dhigooda ah. | Taas macneheedu waxa weeye la qabsi/wax ka badelid ayaa lagu bixiyaa **dhaqanka fasalka ee caadiga ah.** |
| **La qabsi/wax ka badelid dheeriga ah** waxay dhacdaa waxyaabaha qaar marka la sameynayo iyo wakhtiyo gaar ah inta lagu jiro usbuuca. Dugsigu wuxuu ardayga siiyaa xeelado gaar ah. | Tani waxay ka dhigan tahay in la qabsi/wax ka badelid **mararka qaar la sameeyo.** |
| **La qabsi/wax ka badelid la taaban karo** waa taageerooyin ama dib u habeyn lagu sameeyo barnaamijka waxbarashada caadiga ah taas oo ay ardaydu helaan maalmaha badanaa. | Tani waxay ka dhigan tahay la qabsi/wax ka badelid si loo sameeyo **inta badan.** |
| **La qabsi/wax ka badelid aad u culus waa la qabsi shaqsiyeed iyo bartilmaameed iyo/ama taageero degdeg ah oo uu mar walba ardaygu helayo.** | Tani waxay ka dhigan tahay in la qabsi/wax ka badelida la sameeyo **mar walba.** |

Somali | Soomaali

22-030

VICTORIA State Government | Department of Education